Qoraalka rasmiga ee siyaasadda isagoo kooban

Siyaasadda ku salaysan kala duwanaanshada

Dhaqdhaqaaqa Dugsiga dadka waawayn [Folkhögskolan] waxaa hogaan u ah Xeer-maamuleedka aqoon-korarsashada shicibka. Waxyaalaha halkaas ku xusan waxaa kamid ah taxadiyada dhaqamada kala duwan ee bulshada. Sida arrimhaas wax looga qabto awgood, waxaa maamulka dugsiga u degsan nidaam iyo hadaf.

Dugsiga dadka waawayn ee magaalada Eskilstuna [Eskilstuna folkhögskola], dugsi ahaan ka sokkoow waa goob dhaqamada ku kulmaan. Teeda kale, waa goob lagu tixgeliyo khibrada iyo karti-xirfadeedka qof kasta. Waxaana qof kasta la siiyaa fursad u horumar ku gaaro hadba kartidiisa. Dadyoowga dugsiga ku sugan waxay leeyihiin xuquuq laga wada siman yahay, iyadoo fiirogaar ah aan la siin jinsiga qofka, qollada u ka tirsan yahay, waxyaalaha jinsi ahaan u ka helo, itaaldarro ama da'diisa.

Siyaasadda ku salaysan wada sinaanta

Xeer-maamuleedka waxaa kaloo ku xusan hawlaha arrimaha wada sinaansasha ee firfircoon, ay kamid yihiin dhaqdhaqaaqa dugsiga. Wada sinaanshada dumarka iyo ragga waxay sare u qaada tayada dhaqdhaqaaqa dugsiga. Sidaas awgeed, dugsiga dadka waawayn ee magaalada Eskilstuna, wuxuu kor u qaada wada simida shaqo siinta, mushaharada, shuruudadaha shaqo ku qorida iwm ee dumarka iyo ragga.

Dugsiga dadka waayn ee magaalada Eskilstuna, wuxuu aad ugu soo horjeeda una la dagaalama dhibaataynta jinsiga ku salaysan, takoor u sabab ah jinsiga qofka, qollada u ka tirsan yahay, waxyaalaha jinsi ahaan u ka helo iyo itaaldarro.

Fal meelkadhaca ku salaysan oo gaar ahaan qof loo geysto

Fal meelkadhaca ku salaysan oo gaar ahaan qof loo geysto [Kränkande särbehandling] waxaa badi ahaan loola jeeda markii qof wayn loo xoog sheegto, xoog-muquunis maanka, cidlayn iyo dhibaataynta loogu talagalay dadyoow gaar ah ama kooxo (eeg xitaa dhibaataynta jinsiga). Dugsiga dadka waawayn ee magaalada Eskilstuna marna ma u dulqaadan karo dhamaan noociyada meelkadhaca loo geysto shaqaalaha ama dad kale.

Qoraalka rasmiga waxaa ku xusan mas'uuliyada agaasimaha dugsiga, Dowladda hoose Gobolka Sörmland, ururrada shaqaalaha, saaxiibada goobta shaqada, macalimiinta iyo ka qaybgaleha koorsada saaran iyo sida wax ugu qaban lahaayeen falalka meelkadhaca ku salaysan.

Faraxumaynta jinsiga ku salaysan

Dhammaan falalka faraxumaynta jinsiga ku salaysan, waa falal aan marna loo dulqadan karin haddii qofka loo geystay u dhibaatayn ahaan u

dareemmo. Qaabka falka noocaasi loo qiimeeyo waa hadba dareenka dhibanaha ama qofka falkaas loo geystay, taasoo iyadana ku salaysan nidaamka dugsiga u degsan.

Dugsiga dadka waayn ee magaalada Eskilstuna marna ma oggola dhammaan faraxumaynta jinsiga ku salaysan. Sidaas awgeed, ayuu maamulka dugsiga u la dagaalama falalka faraxumaynta jinsiga ku salaysan ee loo geystpo shaqaalaha. Teeda kale, waa in aan xasuusinaa habka aan u dhaqmi lahayn haddii ay dhacaan inkasto digniin ka bixinay.

Nidaamkan wuxuu kaloo khuseeyaa sidashada calaamadaha meelkadhaca ku salaysan

Nidaamka waxaa ku xusan qaabka shaqaalaha ula dhaqmi doonaan, haddii ay la kulmaan qof ka qaybgale ah oo dharkiisa ku sito calaamado ama ku qoran ereyo meelkadhac ah.

Qorsheha u sahlinta ee Dugsiga dadka waayn ee magaalada Eskilstuna u degsan

U sahlinta kama koobna oo keliya soo gelida iyo kabixida qolka. Haddii qofku u la kulmo cillad ama xayiraad ayaa la oran karaa waa qof itaaldarran. Waxaa suurtagal noqon karta in ay jirto cillado la taaban karo, laakinse waxay noqon karaan arrimo xiriir la leh cillida warbixinta, is-gaarsiinta iyo qaabka qaabilaadda.

Maamulka dugsiga wuxuu ku dadaala ciribtirida cilladaha, taasoo suurtagelinayso in qof kasta u ka qaybgalo bulshada waxbarashada. Waxay noqon kartaa arrin xiriir la leh la qabsiinta dhismaha ama xiriir la leh warbixin. Baahida la qabsiinta waxay noqon kartaa deegaanka dibadeed ama gudaheed. Qorshehu wuxuu kaloo suurtagelinayaa helida muqaalka qaabka goobaha dugsiga, loola qabsiyay itaaldarrada kala duwan.

Qorsheha ammaanka

Qorsheha ammaanka dugsiga wuxuu ka kooban yahay, qiimaynta halista iyo halisyada la shaac-bixiyay, qaybsashada mas'uuliyada, qorsheha waxkaqabadyada iyo baahida tababarka. Iyadoo la adeegsanaayo waxkaqabashada halista ee firfircoon, ayaa marka hore lagu dhaqaaqa sidii hoos loogu dhigi lahaa ama loo ciribtiri lahaa halista dhaawacyada ama hoos loogu dhigi lahaa waxyeelkooda haddii ay dhacaan.

Agaasimaha dugsiga ayaa mas'uul ka ah ammaanka ee Dugsiga dadka waayn ee magaalada Eskilstuna. Mas'uuliyada waxyaalaha kimikada ka samaysan waxaa loo qaybiyay macalimiinta. Mas'uuliyada amaanka kombyuutarrada waxay saaran tahay dadyoowga mas'uul ka ah farsamada

warbaahinta casriga. Guddiga ammaanka wuxuu ka arrinsada dhammaan arrimaha ammaanka xiriir la leh. Hawlgallada iyo iskudawaridida arrimaha ammaanka waxaa mas'uul ka ah iskuduwaha arrimaha deegaanka shaqada, mas'uulka ammaanka dab-kaca, iskuduweha arrimaha deegaanka iyo wakiilka guud ee arrimaha ammaanka.

Qorsheha ammaanka wuxuu kaloo ka kooban yahay qoraalada hoos ku xusan; habaynta hawlaha ammaanka dabkaca, qorsheha waxkaqabadka shidada, siyaasadda deegaanka shaqada iyo qorsheha wada sinaanta.

SBA

Waxaa halkaan ku tilmaaman mas'uuliyadda iyo hab-dhiska maamulka dugsiga, ee xiriirka la leh hawlgallada laysaga ilaaliyo dab-kaca (SBA). Dugsiga waxaa joogo qof mas'uul ka ah arrimaha dab-kaca. Waa qof laga helo wixii aqoon ah ee ku saabsan dab-kaca lagana helo warbixinta dhaqdhaqaaqa. Wuxuuna mas'uul ka yahay qalabyada dab-demmiska iyo hirgelinta qorsheha hawlgallada.

Qoraalka waxaa kaloo ku xusan goorta iyo sida loogu dhaqaaqi doono kormeerida iyo sida loo soo bandhigi doono ammaanka dabkaca. Isla qoraalkaas waxaa ku tilmaaman qaabka qorsheha hawlgallada loo fuliyo iyo sida tababarka dabkaca loogu dhaqaaqo. Qoraalka SBA waxaa kaloo ku qoran qorsheha hawlgallada, "Liiska xasuusashada" iyo "Liiska kormeerida ee la qoro tabbabarka goob-firaaqinta iyo dabkaca kaddib" iyo qorsheha goob-firaaqinta dugsiga.

Qorsheha wax looga qabto iskahorimaadyada

Ujeedada qorsheha waxaa weeyaan in la hubsado jiritaanka nidaam laga soo shaqeeyeeyay, oo wax looga qabto iskahorimaadyada kala duwan ee dhici kara, taasoo hoos u dhigaysa dhawaaca urur ama dadyoow soo gari kara. Iyadoo qoraalku la adeegsanaayo ayaa la doonayaa in sare loo qaado lana qeexiyo, qaabka maamulka dugsiga ugu hawlgalo iyo aragtida u ka qabo iskahorimaadyada. Maamulka dugsiga wuxuu doonayaa in ardayda iyo shaqaalaha la garan siiyo sida iskahorimaadyada ka dhaca Dugsiga dadka waayn ee magaalada Eskilstuna wax looga qabto.

Dugsiga dadka waayn ee magaalada Eskilstuna marna ma oggola dhammaan noocyda iskahorimaadyada, kuwaasoo saamayn aan wanaagsanayn ku yeesha caafimaadka dadyoowga ama tayada waxbarashadooda. Maamulka dugsiga wuxuu doonayaa jaw aan mugdi ku jirin oo wanaagsan. Shaqaalaha dugsiga oo idil waxay kaalin ka gesytaan hirgelinta jaw amaan leh oo jira ah. Qof kasta waa in uu iska xilsaara una kari karo sidii wax looqa qabto xaaladaha kala duwan. Tan kale, qof kasta waa in tixgelin u muujiya kala duwanaanshada aadenaha.

Qoraalka rasmiga ee siyaasadda isagoo kooban

Siyaasadda xiriirka la leh daroogada

Dugsiga dadka waayn ee magaalada Eskilstuna waa goob shaqo iyo waxbarasho ka ciribtiran daroogada. Hadafka maamulka dugsiga waxaa weeyaan in u ka hortago falxummada noocyada maandooriyeha, caafimaad-darro, kahortago iskahorimaadyada iyo takoorida ka dhex dhici karto ardayda dhexdooda, taasoo u sabab ah falxummada noocyada maandooriyeha, iyo in la xoojiyo deegaanka bulshada ee dugsiga /goobta waxbarashada.

Shaqaalaha/ardayda khamri kuma cabbi karaan goobaha dugsiga, ama iyago cabsan kuma sugnaan karaan, iyagoo ka qaybgalaayo dhaqdhaqaaqa dugsiga. Waa mamnuuc dhammaan noocyada maandooriyeha ah, ha ahaadeen daroogo, kuwa la ursado, kuwa tamar dheeraadka keena iyo daawooyinka lagu tiriyay in ay yihiin maandooriyeyaal.

Qoraalku wuxuu tilmaamayaa qorsheha hawlgalka ee ardayda, waa markii u shaki jiro ama laga shakisan yahay qof arday ah ku isticmaalaayo daroogo isagoo dugsiga ku sugan. Arrimaha xiriirka la leh ardayda, waxaa ka arrinsado kooxda daryeel-caafimaadeedka ardayda, oo ka kooban SYV, la taliyeha arrimaha bulshada, macallin gaar ah, kaaliyeha agaasimaha dugsiga iyo agaasimaha dugsiga. Waxay dhamaantood tixgeliyaan xajinta sirta xirfada.

Cadaalada ardayda

Qoraalka cadaalada ardayda ee Dugsiga dadka waayn ee magaalada Eskilstuna, waxaa ku qeexan xuquuqda iyo waajibaadka ardayda iyo waajibka warbixin siinta ardayda ee maamulka dugsiga. Warbixinada waxaa kamid ah kharashyada, caddaymaha, caymisyada, ka maqnaanshada, goob-joogida, taageerada waxbarashad, qiimayn iyo saamayn ku yeelanshada ardayda.

Siyaasadda aqbalida

Qofkii 18 sano buuxsaday ama ka wayn ayaa boos ka codsan karo, dhamaan koorsooyinka dhaadheer. Waxaa fiirogaar la siiyaa arjiga la helay kahor maalinta codsasha ugu dambayso. Maamulka dugsiga wuxuu qiimeeyaa sida codsadeha ugu faa'iidaysa doono waxbarashada. Haddii la helo tirada kaqaybgaleyaasha la doonaayay oo keliyay ayay koorsada bilaaban kartaa.

Qoraalka rasmiga ee siyaasadda isagoo kooban

Hanaanka maamulka dugsiga waxaa weeyaan in u helo koox bulshadyda ka tusaale qaadatay. Qoraalka waxaa gaar ahaan ku qoran shuruudaha lagu codsado koorsooyinka bilicsanaanta [estetiska blocket], koorsooyin guud ama maadooyinka [TP/SSAS].

Nidaamka aqbalida

Nidaamka aqbalida Dugsiga dadka waayn ee magaalada Eskilstuna waxaa ku qeeaxan sida looga arrinsado arjiyada. Waxaa halkaas ku xusan sida hawlaha loo kala qaybsaday.

Hakad-gelinta ama ka joojinta waxbarashada

Qoraalka rasmiga waxaa ku qeexan nidaamka hirgalay, ku saabsan haddii qof ka qaybgaleha koorsada ah u go'aansado in uu hakad geliyo waxbarashada. Isla qoraalkaas ayuu ku xusan yahay sida hawlaha loo qaybsaday markii qof ka qaybgaleha koorsada laga joojinaayo ka qaybgelida koorsada, sida haddii usan tixgelin booska waxbarashada (ka maqnaansho aad u wayn) ama usan tixgelin nidaamka dugsiga u degsan. Go'aanka noocaas ah waxaa gaari karo oo keliya agaasimaha dugsiga/kaaliyaha agaasimaha dugsiga.